

# Waa maxay COVID dheeri?

La cusboonaysiiyay 4/2023

COVID dheeri waxaa weeye xaalad la yeelan karo kadib caabuqii COVID-19. Waxaa kamid ah astaamo badan oo kala duwan, waxay saamayn kartaa qayb kasta oo jidhkaaga ah, oo waxay u dhaxaysaa mid dhexe ilaa mid daran. Inkasta oo dad badan oo qaba COVID-19 ay gebi ahaanba ka ladnaadaan dhawr todobaad gudahood, dadka qaar ayaa yeesha COVID dheer oo waxa uu saameeyaa bilo ama sanado.



**Ku dhawaad 1 kamid ah 12 kii ruux ee reer Utah ah ayaa la kulma COVID dheer.**

Qof kasta oo qaaday caabuqa COVID-19 waxa uu qaadi karaa COVID dheer, oo waxaa kamid ah caruurta. Ma garanayno sababta dadka qaar ay u qaadaan COVID dheer. COVID dheer waxa uu saamayn wayn ku yeelan karaa nololshaada-waxaa dhici karta in aanad qaban karin dugsiga ama shaqada, daryeelka qoyskaaga, ama inaad qabato hawlaha caadiga ah.

## Waa maxay qaar kamid ah astaamaha COVID dheeri?

Dadka qaba COVID dheer waxay la kulmi karaan astaamo kala duwan. Astamaha qaar ugu caansan waxaa kamid ah:

- Jir xanuun
- Isbedelo ku yimaadda wareega caadada
- Qufac
- Isku buuq ama warwar
- Shuban
- Mushkilad fikirka ama u fiirsasho wax (maqnaanshe maskaxda ah)
- Dawakhaad marka la istaago
- Daal
- Garaac wadne oo dhakhso ah ama wayn
- Qandho
- Timaha oo daata
- Madax-xanuun
- Waayitaan ama isbedel dhadhanka ama urta
- Neefta oo kugu adkaata ama mushkilad neefsiga ah
- Dhibaatooyin hurdada ah
- Calool xanuun
- Astamaha oo kasii dara kadib marka la sameeyo jimicsi jidhka ama maskaxda (post-exertional malaise)
- Furuuruc

Hadii COVID dheer si weyn u xadido mid ama wax ka badan oo kamid ah hawlaha nololsha ee waawayn, markaa waxaa uu noqonayaa laxaad la'aan sida ay dhigayaan tilmaamaha Sharciga Maraykanka Laxaadka La' (ADA). Waxa aad sidoo kale u qalmi kartaa gunooyinka sida Medicaid ama Caymiska Laxaad La'aanta Sooshaal Sekuuritiga.

Kala hadal dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaad hadii aad yeelato wax kamid ah astaamahan ugu yaraan 3 bilood kadib caabuqa COVID.

Wakhti xaadirkan, malaha dawo COVID dheer, laakiin dhakhtar ayaa kaa caawin kara astaamaha sidii aad u maamuli lahayd.

**Macluumaad dheeraad ah ka oggaw:** <https://coronavirus.utah.gov/covid19-long-haulers/>